



U Gudbidda dhalinyarada adeegyada kaalmada

ISBEDDELKA ADEEGYADA COVID-19 DARTEED

Kaalamada hoos imanaysa Kaalmada U Gudbidda Dhalinyarada ee adeegyada waa sii soconayaa inay helaan inta lagu jiro faafida COVID-19. Si kastaba, sida loo bixiyo adeega waa laga yaabaa inay isbedesho sida waafaqsan talada sarkaalka caafimaadka.

Halkii la ishorfadhiisan lahaa ama fadhi kooxeed, kulan shakhsi ah oo macmiilaha waxaa hadda lagu samaynayaa telefoon kuwa bixinayaana waxay qabanayaan hawl kooxeed lagu xiriirayo habab kala duwan oo bulsho oo uu ku jiro Zoom, whatsapp iyo Facebook.

Adeegbixiyayaasha ayaa gelaya adeegyada ku tarjumida telefoonka macmiilaha aan ku hadlin Ingiriiska.

Baro wixii ku saaban [COVID-19 iyo astaameheeda](#).

Waa maxay Adeegyada Kaalmada Gudbidda Dhalinyarada (YTS)?

Adeegga YTS wuxuu caawimaa dhalinyarada ku yimid habka adaamiga iyo soogalootiga halista ku jira oo da'doodu tahay 15 ilaa 25 sano si ay uga qaybgalaan shaqooyinka iyo waxbarashada, u wanaajiyaan diyaargarawgooda shaqada, ayna u siiso fursadaha shaqada, una abuurto xiriir adag oo waxbarasho iyo cayaaraha.

Kuwa dhalinta yar ee ku soo galay habka aadamiga iyo soogalootiga waxay la kulmi karaan loolan xagga helidda adeegyada kaalmada, xal u helidda dhibta tababarka iyo u asaasidda naftooda shaqo, badanaana waxay u baahan yihiin caawima siyaada ah si ay u noqdaan kuwa ku xiran bulshadooda cusub.

Taas sababta keeni karta ayaa waxaa ka mid ah luqada iyo caqabadaha dhaqanka, iyo/ama maqnaanshaha shakabad dhisan iyo aqoonta suuqa shaqada.

Qoysaska dadka dhalinta yar ayaa laga yaabaa in ay la daala dhacayaan arrimaha lahaanshaha iyo ku xirnaanta bulshada.

Adeegyada YTS waxaa lagu bixiya mashaariic kala duwan iyo da'daalo ay ka mid yihiin caawinta dadka dhalinyarada ah si ay u helaan adeegyada shaqada iyo shaqooyinka, tababarada xirfadeed ama waxbarasho kale.

Sidee adeegyada YTS u caawin karaan dadka dhalinyarada ah?

Adeegyada YTS waxay caawimaan dhisida awooda iyo dulqaadka iyo adkaysiga dhalinyarada iyo soogalootiga kale ee xaqa u leh inay sii wataan waxbarashada una gudbaan si guul leh xagga shaqada.

Adeegyada YTS waxay diirada saaraan afar meelood oo muhiima:

- Ka wadashaqaynta shaqada si loo wanaajiyo u diyaargarawga shaqada ee dadka dhalinta yar.
- Xiriir xooggan oo Waxbarasho si loo kaalmeeyo dadka dhalinta yari inay ku xirnaadaan waxbarashada.
- Fursadaha mihnadeed si loo caawimo dadka dhalinta yar inay hellaan oo xoojiyaam xirfadahooda mihnadeed.
- Ku xirnaanta cayaaraha si looga caawimo dadka dhalinta yar inay yeeshaan ku xirnaan bulsho iyo inay kalsoon ku hellaan barnaamijyada cayaaraha.

Xaq ma u leeyahay in aan helo adeegyo?

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay adeegyada YTS haddii aad haysato deganaansho rasmi ah aadna jirto 15 ilaa 25 sano aadna timid Australia shantii sano oo ugu dambaysay qof ku soo galay habka aadamiga, ama soogalootiga habka qoyska oo heerka luqadiisa Ingiriiskuna hoosayso.

Sidee ku heli karaa adeegyada YTS?

Godka hoose wuxuu taxayaa adeegyada adeegbixiyayaashu siinayaan adeegyada YTS. Haddii aad danaynayso ka qaybgelidda barnaamijka, fadlan la xiriir adeegbixiyaha agtaada ah.

Adeeg Bixiye	Adeegyada YTS waxaa laga helaa goobaha socda
Lebanese Muslim Association	Canterbury, Bankstown, Liverpool and Fairfield, NSW
Community Migrant Resource Centre Inc (Parramatta)	Auburn and Blacktown, NSW
Multicultural Australia	Brisbane, QLD
Access Community Services Limited	Logan, QLD
Victorian Foundation for Survivors of Torture Inc (Foundation House)	Greater Dandenong, Casey, Hume, Brimbank, Darebin, Maribyrnong, Melbourne and Whitehorse, VIC
Brotherhood of St Laurence	Hume, VIC